

# Aqoonsiga Shakhsi ahaaneed Isirka iyo Qowmiyada oo Ikhtiyaar ah

Nidaam cusub, oo bilaabmaya Janaayo 2025, oo cashuur bixiyhu uu dooran karo inuu siiyo macluumaadka ku saabsan isirkiisa iyo qoomiyadiisa Oregon Department of Revenue marka uu xaraynayo cashuur celinta dakhliga shakhsi ahaaneed.

## Maxay tahay?

SAqoonsiga Shakhsi ahaaneed waa marka cashuur bixiye uu doorto inuu u sheego macluumaadka isirkiisa iyo qoomiyadiisa ee Oregon Department of Revenue.

Si uu u sheego macluumaadka, cashuur bixiyuhu waxa uu u isticmaalayaa foom kale oo uu raacinayo cashuur celinta dakhliga Oregon. Dadka aan lahayn shuruudaha xaraynta celinta waxay si gaar ah ugu xarayn karaan foomka Dakhliga Onleynka ah.

## Waa maxay sababta aan u codsanaynaa?

Jawaabahaaga su'aalaha isirka iyo qawmiyada waxay ka caawin doonaan dhaqaalayaanada gobolka iyo cilmi badhayaasha inay naqdiyaan siyaasada sinaan la'aanta cashuurta. Daraasadoodu waxay sheegi doontaa wada hadalka siyaasada cashuurta ee wakhtigan iyo mustaqbalka.

Ka qaybqaadashada cashuur bixiyaha ee Oregon oo dhan waa muhiim. Cashuur bixiyayaal badan ayaa dooran kara inay wadaagaan qoomiyadooda iyo isirkooda si loo saxo xogta daraasada ee la samayn doono.

## Adiga ayaa go'aansanaya.

Adiga ayay kugu xiran tahay inaad ka jawaabto su'aalaha ku saabsan isirka iyo qawmiyada. Foomku waa ikhtiyaar. Kugu waajib maaha inaad ka jawaabto su'aalaha isirka iyo qawmiyada

Oregon Department of Revenue waxay rajaynaysaa inaad ka jawaabi doonto su'aalaha, si markaa aanu si dhaanta ugu wada adeegno adiga iyo dhamaan dadka reer Oregon.

## Sidee ayaad u ilaalinaysaan asturnaantayda?

Waxa aanu doonaynaa in ruux walba uu dareemo amaan uu kaga jawaabo su'aalaha ku saabsan isirka iyo qawmiyada Macluumaadkaagu waa sir oo waa la ilaaliyay.

Waxa aanu ilaalin doonaa xogtaada oo kaliya shakhsiyada loo ogol yahay ayaa geli kara. Uma isticmaali doono xogtaada ujeedo kale. Macluumaadka isirkaaga iyo qawmiyadaada lama raacin doono wax macluumaad sheegeysa haybta shakhsi ahaaneed, sida magaca, cinwaanka deeganka, ama lambarka taleefanka.

Xirfadlayaasha cashuurta iyo shirkadaha sameeya sooftiweerka cashuurta uma isticmaali doonaan xogtaada wax kale oo ujeedo ah oo aan ka ahayn inay kaa caawiyaan xaraynta cashuur celintaada.

Lama wadaagi doono xogtaada Adeega Dakhliga Gudaha "Internal Revenue Service, IRS".

**Waxa aad ku celi kartaa waraaqahan luuqado kale, far waawayn, farta indhoolka ama qaab kale oo aad doonayso si bilaash ah. La xiriirdor.comms@dor.oregon.gov wixii codsiyadaada ah.**